

Young Audiences Run for the Arts

Qoysaska Sharafta leh,

Young Audiences waa urur farshaxan oo aan macaash-doon ahayn oo ka shaqeeya dhiirgalinta da'yarta sidoo kalena fidiya barashadooda farshaxanka. Ilaa 1977, Young Audiences wuxuu ka caawiyey dugsiyada iyo ardayda qaadhaan ururin loogu talagalay barnaamijyada farshaxanka dugsiga dhexdiisa ee Run for the Arts. Lacagta lagu ururiyo Run waxa loo isticmaali doonaa waxqabadyada, siminaarrada iyo meelaha la deggan yahay ee leh farshaxaniistayaal barid oo xirfadeed, safarrada aqoon korodhsi, iyo agabka farshaxanka.

Ka qaybqaadashada ilmahaaga ee Run waa mid ikhtiyaari ah, hase yeeshee waxaan rajaynayaa inaad ku dhiirgalin doonto inuu ku biiro/in ay ku biirto, madadaaloodo/in ay ku madadaalooto, oo uu taageero/ay taageerto dugsigayaga.

Fadlan caawi ilmahaaga adigoo:

- U Akhrinaya **Xaashida Kafiilka Run for the Arts** ee ilmahaagu guriga keeno. Fadlan **saxeex "Heshiiska Waalidka/Wakiilka" oo u buuxi xajmiga garanka ilmahaaga**. Garamadu waa mid kamid ah jaa'isadaha ay suurogal tahay ilmahaagu inuu helo.
- Diiwaangalinta ilmahaaga si uu u qaato deeqaha onlaynka ah ee **runforthearts.ya-or.org**. Ardaydu waxay ku qaadan karaan deeqaha onlayn, ku qaadan karaan iyagoo xaadir ah, ama dooran karaan inay sameeyaan labadaba.
- Ka qaadashada deeqaha qoyska, saaxiibada iyo jaarka iyadoo la wadaagayo linkiga onlaynka ah ama la urursanayo deeqaha qofku xaadirka yahay.

Ka caawi ilmahaaga inuu raaco jadwalka wakhtiga ee ku qoran hoos si aanu wakhtiga kama dambaysta ah loo dhaafin.

Xaashiyaha Kafiilka la Sugayo	Taariikhda Run for the Arts	Maalinta Roob jiro	Lacagta waxa la Sugayaa
<p>Ururso ballanqaadyo kahor taariikhdan. Xaashiyaha Kafiilka waa in loo dhiibo dugsiga taariikhdan.</p>	<p>Ardayda hawsha wadda maalintan. Xaashiyaha Kafiilka waxa lagu soo celin doonaa ardayda, kadib hawsha si loo siiyo qoysaska wakhti ay kaga qaataan lacagta kafiillada</p>	<p>Qoysaska waa la ogaysiin doonaa haddii taariikhda Run la beddelo.</p>	<p>Dhammaan Qaadhaamada iyo Xaashiyaha Kafiilka WAA INlagu soo celiyo dugsiga taariikhdan.</p>

Caawimadaada darteed, dugsiyeenu wuxuu heli doonaa Run for Arts la yaab leh.

Mahadsanid!